

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**


**Golaha Shacabka**

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**

**KU SAABSAN**

**SUGIDDA TAXANAHA GOLAYAASHA SHARCIDEJINTA EE  
SOOMAALIYA**

Muqdisho, 4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014

  
Bogga 1

## GOLAHA SHACABKA:

### 1. Gogoldhig:

Burburkii Dawladda Soomaaliyed ee dhacay 1991kii waxaa ku lumay raadraacyo fara badan oo taariikhda Soomaaliyed wax ku ool u ahaa. Qoraallo qimahooda aan la qiyasi karin oo ku keydsanaa xafiisyadii dawladda ee heer Qaran, heer gobol iyo heer degmo iyo matxafyadii Qaranka intuba nasiib darro waa ay baba'een.

Guudoonka Golaha Shacabku wuxuu isku taxallujiyay in uu u kuurgalo, dibna u nooleeyo taariikhda taxanaha golayaashii sharcidejinta ee Soomaaliya. Baaris kaddib, waxaa lagu guuleystay raadraac lagu gaaray in la helo marxaladihii kala duwanaa ee golayaashii sharcidejinta Soomaaliya.

Soomaaliya, sida laga war hayo, weligeed waa ay lahayd xeerar iyo sharci shacabkeedu ku kala baxo oo ku salaysnaa Shareecada Islaamka iyo xeerar dhaqan. Hayeeshee adduunka isbeddel weyn ayaa ka dhacay xagga sharcidejinta.

Dawladihii abuurmay ama isku abaabulay waayo-aragnimadii laga helay Kacaankii Fransiiska ee dhammaadka qarnigii 16aad waxay samaysteen golayaal sharcidejin oo u xilsaarnaa in ay dalka u dejiyaan hadba shariyada dalku u baahdo.

Dhammaadkii qarnigii 19aad Soomaaliya waxay gacanta u gashay dawlado Reer Galbeed ah oo la wareegay maamulkii dalka. Waqooyiga Soomaaliya waxaa qabsaday Ingiriiska, Koofurna Talyaaniga. Shareecada iyo Xeer Soomaaliga ka sokow, waxaa bilowday in labada Gobol lagu dhaqo shariyo ka mid ah kuwii ka jiray dalalka labadaas dawladood.

Dhammaadka Dagaalkii Labaad ee Adduunweynaha, dalalkii la isticmaarsan jiray waxaa u dhashay yidiiddiilo iyo himilo ah in ka xoroobaan gacanta dawladaha Reer Galbeedka, helaanna madaxbannaani iyo dawladnimo.

1950<sup>kii</sup> Soomaaliya waxaa ku soo laabatay dawladdii Talyaaniga oo Wakiil ka ah Qarammada Midoobay, iyadoo loo xilsaaran in ay Soomaaliya gaarsiiso muddo toban sano gudaheeda madaxbannaani huwan biseyl siyaasadeed iyo mid aqooneeed oo ay isku maamusho. Maamulkaas magaciisu wuxuu ahaa

"Amministrazione Fiduciaria Italiana della Soomaalia" oo lagu gaabin jiray xarfaha "AFIS".

1951<sup>kii</sup> ilaa 1955<sup>kii</sup> waxaa laga dhisay Soomaaliyada Koofureed shan gole oo midkiiba hawlgeli jiray hal sano. Waxaa golayaashaas la dhihi jiray "Consiglio Territoriale" (Golaha Deegaanada) waxayna ka doodi jireen, talana ka dhiibban jireen hadba arrimaha talada laga weydiyo. Waxay ahaayeen golayaal la-tashi oo ku shaqayn jiray xag farsamo iyo ilaa xad xag nuxurba qaab baarlamaani ah.

1956<sup>kii</sup> waxaa Koofurta Soomaaliya ka qabsoontay doorashadii siyaasadeed ee u horreysay, waxaana lagu soo doortay Gole lagu magacaabay Golaha Sharcidejinta (Assemblea Legislativa) oo awood sharcidejineed buuxda lahaa, wuxuuna qaatay oo rasmi ahaan lagu magacaabay Madasha sharcidejinta 1aad.

Doorashadii xigtay oo dhacday 1959<sup>kii</sup> waxaa lagu doortay Golihii Sharcidejinta Labaad oo isla habkii hore ku shaqaynayay.

1dii Luulyo 1960<sup>kii</sup> waxaa dhalatay Jamhuuriyaddii Soomaaliya oo ka koobantay Waqooyiga Soomaaliya (Ex British Somaliland) oo madaxbannaanideeda ka qaadatay Ingiririiska 26kii Juun 1960 iyo Koofurta Soomaaliya oo ku jirtay Wasaayadda Talyaaniga. Labadii Gole barlamaan ee ka kala jiray labada gobol oo wadajirkooda ka koobnaa 123 Xildhibaan (90 Koofur, 33 Woqooyi) ayaa noqday Golihii sharcidejinta Soomaaliyeed, wuxuuna xagga tixda qaatay kii ka jiray Koofurta oo xilligaas ahaa "Madasha Sharcidejinta Labaad".

Sannadaha 1964<sup>ti</sup> iyo 1969<sup>kii</sup>, laba doorasho kale ayaa la qabtay, golayaashii ka soo baxyne waxay qaateen magacyada Madasha Sharcidejinta 3aad iyo madasha sharcidejinta 4aad.

Xilligii Kacaanka laba doorasho barlamaan ayaa qabsoontay: 1980 iyo 1986.

2000 ilaa 2012ka waxaa dhismay saddex gole oo kala ah:

kii Carta, midkii Imbigati oo laba jeer muddada loo kordhiyay iyo midka hadda shaqeeya oo dastuur ahaan ku magacaaban "Golaha Shacabka ee Barlamaanka Federaalka".

**2. Go'aan:**

Iyadoo ujeeddadu ay tahay in si rasmi ah loo xafido marxaladihii kala duwanaa ee golayaashii sharcidejinta Soomaaliya, Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya Kalfadhigiisa 3aad kulankiisa 49aad ee 4/01/2014 wuxuu go'aan ku gaaray in taxanaha sharcidejinta Dawladda Soomaaliya la sugo, loona aqoonsado sida soo socota:

- Madasha sharcidejinta 1aad: 1956 – 1959;
- Madasha sharcidejinta 2aad: 1959 – 1964;
- Madasha sharcidejinta 3aad: 1964 – 1969;
- Madasha sharcidejinta 4aad: 1969 - 21ka Oktoobar 1969.
- Madasha sharcidejinta 5aad: 1980 – 1986;
- Madasha sharcidejinta 6aad: 1986 - Jennaayo 1991;
- Madasha sharcidejinta 7aad: 2000 – 2003;
- Madasha sharcidejinta 8aad: 2004 – 2012;
- Madasha sharcidejinta 9aad: 2012 – 2016.

Go'aankan waxaa lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



Guddoomiyaha Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawari"

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiqa: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



Guddoomiyaha Golaha Shacabka KMG ah ee Jamhuuriyadda Fedaraalka Soomaaliya  
M.ne Shariif Xasan Sh. Aadan 2004 – 2007 iyo 2010 - 2012

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

QARAAR GOLAHADHKA SHACABKA

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



Guddoomiyaha Golaha shacabka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
M.ne, Sh. Aadan Maxamed Nuur 2007 – 2010

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

QARAAR GOLAHADHKA SHACABKA

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



Guddoomiyaha Golaha Shacabka KMG ee Soomaaliya  
M. ne Cabdalla Deerow Isaaq 2000 - 2004

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya  
M.ne S/Gaas Xuseen Kulmiye Afrax 1989 – 1991

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014




Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya  
M.ne S/Guuto Max'ed Ibraahim "liiqliiqato" 1982 - 1988

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya  
M.ne S/Guuto Ismaacil Cali Obokor 1979 - 1982

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka Jamhuuriyadda Soomaaliya  
M.ne Sh. Muqtaar Maxamed Xuseen 1967- 1969

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka Jamhuuriyadda Soomaaliya  
M.ne Axmed Sh. Maxamed Cabsiye 1964 – 1967

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



Guddoomiyaha Golaha Baarlamaanka Jamhuuriyadda Soomaaliya  
M.ne Jaamac C/llaahi Qaalib 1960 – 1964

Tix: GSH/02/14  
Kalfadhiga: 3aad  
Kulankiisa: 49aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

4<sup>ta</sup> Jennaayo 2014



Guddoomiyaha Golaha Sharci-dejinta Jamhuuriyadda Soomaaliya  
M.ne Aadan Cabdulle Cusmaan 1956 - 1960